

# Common Views about Bullying

## Fikradaha caadiga ah ee laga Qabo Handadaada.



### Fikradaha caadiga ah ee laga qabo Handadaada

Inkasta oo la ogayahay in handadaadu ay u xuntahay caruurta, hadana waxa aad moodaa in ay tahay dabeecad loo haysto in ay caadi tahay. Waxa jira fikrado badan oo laga qabo handadaada oo u daran ilamha. Waxana ka mid ah kuwa hoos ku qoran:

- will waa wiil. Taa waxa loo micnayn karaa in handadaado ay tahay caadi.-waa wax caadi ah in ay wiilasho noqdaan kuwo wax handada. Laakiin waxa la'ogaaday in hadadaado ay tahy dabci laga baran karo qof kale, ayna ahayn mid caadi ah.
- Gabdhuhu ma handadaan (bully). Waxa baadhitaan lagu ogaaday in gabdhuhu ay samayn karaan handadaad. Inkasta oo sida wiilasha ayna lahayn handadaad gacan qaad leh, waxase dhacda in ay afka ka handadaan. Taasina waxa ay dhacdaa marka gabdhuhu ay ku jiraan dugsigaa dhexe.
- hadal waxba kuma yeeli karo. Baadhitaan waxa lagu ogaaday in erayado inkasto oo ayna qofka nabar muuqda u gagsan, hadana waxa ay ku reebi kartaa nabaro badan oo dareenka ilmaha wax u dhima. Waxa ay caruurta bartaan in erayadu ay nabar u gaystaan marka ay yaryihiin.
- Handadaado waa wax la xiriira caruurnimada. Waxa handadaada caadi ka dhigi karaa ma jiro. Waa waxa caruunimo ku lug leh, laakiin ma aha wax caadi ah. Gacan qaad iyo hadl xumo midna ma aha wax loo dul qaadan karo marnaba.
- Dadka qaarkood ayaa ku fiican in la handado. Handadaado ilmo ay ku fiican tahay

ma jiro. Runtii, ilmaha ka gadisan caruurta kale waxa uu u baahanyahay in sii fiican loola dhaqmo.

- Handadaado ilmaha way adkaysaa. Handadaado qofna ma galiso adadayg. Waxase baadhitaan lagu ogaaday in ay wax wayn u dhinto - taas oo ah in aay hoos u dhigto kalsoonida iyo dadnimada ilmaha. Hadndadaado badi ilmaha waxa ay galisaa cabsi iyo walaac.
- Macalinka oo la ogaysiiyo handadaada waa dhib soo jiido. Waa in caruurta la ogaysiiyaa in macalinka oo la war galiya in ay isbadal wayn leedahay. Hadii la qariyo waxa ay ka dhigantahay in handadaado ay tahy wax caadi ah.
- Kaftan ayay iga ahayd. Caruurta badi way kaftamaan; kaftan aan waxyeelo lahayn ma aha handadaad. Kaftanku waxa uu noqon karaa handadaad marka ilmo laxaad l'a uuna u qaadan kaftan ee waxyeelo ay noqoto.

Waxa lagasoo guuriyay buuga ah "the bully-free classroom: over 100 tips and strategies for teachers k-8" by Allan L. Beane Ph.D ©1999. used with permission from free spirit publication Inc. Minneapolis, MN: 1-866-703-7322; [www.freesprit.com](http://www.freesprit.com) All rights reserved.

